

# Hiigsiga ESIT iyo Baadhista Maqalka:

## Hagaha Qoyska ee Nidaamka Saddex Geesoodka ah

*Cunugna kama yara inuu leeyahay araga iyo baadhis maqal.*

### Waa maxay sababta araga iyo maqalka?

Araggaa iyo maqalku waa dariiqooyin muhiim ah oo carruurtu ku bartaan adduunkooda. Helitaanka tabashooyinka maqalka iyo araggaa goor hore waxay caawinaysaa ilmahaaga inuu horumaro. Wuxaad heli doontaa caawimada aad u baahan tahay, hadda laga bilaabo.

### Waa Maxay Nidaamka Saddex Geesoodka ahi?

Nidaamka Saddex Geesoodka ahi waa sida bixiyahaaga ESIT (Early Support for Infants and Toddlers) (Barbaarinta Dhallaanka iyo Kuwo Raadqaadka ah) uu u hubin doono tabashooyinka ku saabsan araggaa iyo maqalka ilmahaaga. Kani maaha baadhitaan rasmi ah mana aha inuu qaato booska qiimaynta buuxda ee dhugta ama dhakhtarka indhaha. Nidaamka Saddex Geesoodka ahi wuxuu naga caawin doonaa haddii ilmahaagu uu u baahan yahay qiimayn dhamaystiran oo araga ah iyo mid maqalka ah.



### Maxaa dhacaya inta lagu gudo jiro Nidaamka Saddex Geesoodka?

Bixiyahaaga ESIT wuxuu:

- Kaala hadli doonaa waxyaabo ku saabsan tabashooyinka uu qabo ilmahaagu ee dhinaca araga iyo maqalka.
- Ku daawadsiindoona sida ilmahaagu u isticmaalo maqalka iyo dhagaysiga sida uu u ciyaaro ee uu u qabto hawlaha maalinlaha ah.
- Eeg diwaanada caafimaad ee ilmahaaga. Waxay ku waydiin doonaan waxyaabo ku saabsan waxa dhakhtarkaagu kuu sheegay ee ku saabsan koritaanka caafimaadka ilmahaaga.

### Maxaa dhacaya kadib Nidaamka Saddex Geesoodka?

Haddii ay jiraan wax tabasho ah oo la xidhiidha maqalka iyo araga ilmahaaga, adiga iyo bixiyahaaga ESIT waxaad samaysan doontaan qorshe lasocod. Qorshahan waxa kujiri kara qiimaynta bixiyaasha caafimaad iyo/ ama waxbarista gaarka ah ee uu siiyo bixiyaha ESIT.

### Intee inleeg oo kharash ayay ku kacaysaa?

Wax kharash ah lagaama baahna adiga. Nidaamkan Saddex Geesoodka ahi wuxuu qayb ka yahay nidaamka qiimaynta bilaashka ah ee ay ESIT bixinayso.

### Su'aalo dheeraad ah?

Waxa naga go'an inaan ku taageerno si aan kaaga caawino koritaanka ilmahaaga. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan weydii bixiyaha ESIT.

DCYF ma takoorto waxayna usiisaa helitaan siman barnamijyadeeda iyo adeegyadeeda, dhamaan dadka iyadoon loo tixgalin isirka, midabka, jinsiga, diinta, caqiidada, xaalada guur, dhalashada, rabitaanka galmo, da'da, xaalad ciidan ama jiritaanka naafu jidheed, dareen, ama maskaxeed.

Haddii aad rabto nuquollo dukumeenti ah oo qaab kale ah ama luuqad kale ah, fadlan kala xidhiid DCYF Constituent Relations (Xidhiidhiyaha Qaybaha Telefoonka) 1-800-723-4831 ama iimaylka [communications@dcyf.wa.gov](mailto:communications@dcyf.wa.gov).

DCYF PUBLICATION EL\_0069 SM (05-2023) Somali



Washington State Department of  
**CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**